



Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu kor u qaadi jiray gacmihiisa ilaa meel ku aadan garbihiisa markuu salaada xiranaayo

Cabdulaahi Binu Cumar-Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye- Waxaa laga wariyey:

Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu kor u qaadi jiray gacmihiisa ilaa meel ku aadan garbihiisa markuu salaada xiranaayo, iyo haduu rukuuca u takbiirsado, iyo haduu madaxiisa kor uga soo qaadayo rukuuca, sidaas oo kale ayuu gacmihiisa kor ugu qaadi jirey, wuxuuna dhahaayey: "Ilaahay wuu maqlaa qofkii ku xamdiya, Rabiyouw aday mahadi kuu sugnaatay", sidaana kuma samayn jirin sujuuda.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ahaa inuu saddex meelood oo salaada ka mida gacmihiisa kor u qaado ilaa meel la siman garabka garabkuna waa meesha ay isugu yimaadaan lafta garabka iyo cududu. meesha 1aad: waa markuu salaada xiranaayo. meesha 2aad: markuu rukuucda u takbiirsanaayo. meesha 3aad: waa markuu rukuucda ka tooso, ee uu dhahayo: Ilaahay wuu maqlaa qofka ku xamdiya, Rabigayow aday mahadi kuu sugnaatay. Mana ahayn mid gacmihiisa kor u qaada markuu sujuuda bilaabay, iyo markuu ka soo kacayo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3095>

